**DUQA WU IYO XAFIISKA AFKA IYO XIDHIIDHKA HORUMARINTA LUUQADA HOR MARINTA IYO WARARKA QORSHEYAYAASHA HOR MARINTA ISGAARSINTA**

*Qorshayaasha loogu talagalay in lagu wanaajiyo dadaallada waaxyaha Magaalada si loo hubiyo in dadka deegaanka ay si wanaagsan u heli karaan oo ay ula macaamili karaan barnaamijyada, adeegyada iyo macluumaadka Magaalada*

BOSTON - Isniin, Abriil 8, 2024 - Mayor Wu iyo Office of Language and Communication Access (Xafiiska Helitaanka Luuqadda iyo Isgaadhsiinta (OLCA)) ayaa daabacay Qorshayaasha Helitaanka Luuqadda iyo Isgaarsiinta ee 19 waaxood oo magaalada ah. Qorshayaashan ayaa ah gunaanadkii wada shaqayntii 12 bilood ee ka dhaxaysay shaqaalaha OLCA iyo waaxaha si si ula kac ah loo hubiyo in adeegyada waaxda, hawlaha iyo macluumaadka ay heli karaan dadka u aqoonsada inay ku hadlayaan luuqad aan Ingiriisi ahayn ama dadka naafada ah ee xidhiidhka la leh.

"In la hubiyo in waaxyada magaaladeenu ay bixiyaan adeegyo la heli karo, luqad ula kac ah iyo isgaarsiin la heli karo dadka deggan iyo qoysaska ayaa muhiim u ah ka dhigista Boston magaalo qof walba," ayay tiri **Duqa magaalada Michelle Wu**. "Qorshayaashan waaxeed ee muhiimka ah waa tallaabo weyn oo lagu dhisayo Magaalo si dhab ah u soo dhawaynaysa dhammaanba, aad ayaan ugu faraxsanahay inaan arko sida isbeddelladan muhiimka ah ee gelitaanka luqadda iyo isgaarsiinta ay ugu adeegaan dadka reer Boston."

"Luqadda aan ku hadalno waa inaan marnaba caqabad ku noqon helitaanka adeegyada ama ka qaybgalka nolosha bulshada," ayuu yiri **Madaxa Sinnaanta iyo ku-darka Mariangely Solis Cervera**. baahi kastana waa la daboolay".

Sannadkii hore, Duqa Wu waxa uu ku dhawaaqay wajigii koowaad ee hirgelinta siyaasadda gelitaanka Luuqadda iyo Isgaadhsiinta ee magaalada Boston oo dhan. Dadaallada hirgelinta waxaa ka mid ah abuurista qorshooyinka gelitaanka luqadda dadweynaha iyo isgaarsiinta, garashada iyo tarjumaada dukumentiyada iyo macluumaadka muhiimka ah, ogaanshaha barnaamijyada iyo dhacdooyinka muhiimka ah iyo tababarida dhammaan shaqaalaha waaxda bixinta adeegyada luqadda iyo isgaarsiinta.

Wajiga koowaad ee habka dhaqangelinta waxa uu diiradda saari doonaa qaybo ka mid ah, oo loo kala saaray waaxaha tier I, oo leh ka qaybqaadashada muhiimka ah fayo-qabka xubinta, badbaadada, iyo helitaanka macluumaadka muhiimka ah. Waaxyaha heerka 1-aad ee ka qayb galaya wajigan koowaad waxaa ka mid ah:

- Waaxda Booliska Boston, Waaxda Dabka Boston, Xafiiska La Xisaabta iyo Bayaaminta Bilayska, Xafiiska Maamulka Gurmadka, Xafiiska Guriyaynta, Xafiiska cadaalada Cuntadda, Waaxda Doorashooyinka , Xafiiska Adeegyada Xaafada, Xafiiska Abaabulka Madaniga ah, BOS:311, Qaybta Ururinta Dakhliga, Xafiiska wada Xidhiidhka iyo Golaha Sinnaanta iyo Wada Jirka waxaa kamid ah: Xafiiska Horumarinta Labka Madow , Xafiiska Horumarka Muhaajirku, Xafiiska Horumarka Haweenka, Guddida Naafooyinka, Xafiiska Horumarinta LGBTQ+, Xafiiska Helitaanka Luuqadda iyo Isgaadhsiinta, Guriyaynta Xaqa ah iyo Sinaanta.

Iyada oo la isku duba rido waaxyo kala duwan, shaqadani waxa ay keentay in la wanaajiyo adeeg bixinta qaybaha kala duwan ee u horseedaya waayo-aragnimo degane oo togan. Horumarinta waxaa ka mid ah laakiin aan ku xaddidnayn: Ogeysiisyada Qoraalka Degdega ah ee Magaalada oo lagu gudbiyo 11 luqadood, Xarunta Booliska Boston iyo Xafiisyada Degmada oo bixiya tarjumaad taleefan ama kamarad shabakad ah marka la taageerayo xubnaha, goobaha codbixinta oo ay ka shaqeeyaan shaqaale laba luqadle ah iyo turjubaano xirfad leh.

Deganayaashu waxay xaq u leeyihiin inay ashtako ka xareeyaan Xafiiska Helitaanka Luuqadda iyo Isgaarsiinta haddii aad dareento in lagugu sameeyay takoor. Magaaladu kama aargoosato sababtoo ah shaqsi ayaa soo gudbiyay cabasho ku saabsan takoorid ku salaysan heerka LOTE ama naafo. Booqo boston.gov/lca si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida loo xareeyo ashtako onlayn, telefoon, iimayl ama qof ahaan.

“Barnaamijka Ingiriisida iyo soo-galootiga Mareykanka ahaan, waxaan aqaan marka hore in Caqabadaha luqadda saameyn ku yeelan karaan caafimaadka iyo fayoqabka qofka iyo qoyska. Luqadu waxay noqon kartaa qalab qurux badan oo dadka isku keena, abuura kalsooni iyo kobcinta iskaashiga, "ayuu yiri **Jeniffer Vivar Wong, Agaasimaha Helitaanka Luuqadda iyo Isgaarsiinta**. "Taasi waa sababta ay xafiiskayaga mudnaanta u leedahay si loo hubiyo in waax kasta ay bixiso adeegyada luqadda ula kac ah iyo isgaarsiinta dhammaan qaybaha. Waxaan ognahay sida ay muhiimka u tahay in isbedelo nidaamsan lagu sameeyo magaalada oo dhan si loo hubiyo in dhamaan reer Boston ay dareemaan soo dhawayn, la maqlo oo lagu arko Magaalada Boston. Shaqadani ma suurtoobi karto la'aanteed dadaalka adag iyo ka go'naanta kooxda LCA iyo la-hawlgalayaasha waaxaha.”

Iyada oo lagu dhisayo aragtida Duqa Wu ee ah abuurista Magaalo uu qof kasta oo degani ku dareemo guriga, Xafiiska Duqa Magaalada ee Luuqadda iyo Helitaanka Isgaadhsiinta (OLCA) waxa uu ku dadaalaa in uu xoojiyo dadka ku hadla luqadaha oo dhan iyo awoodaha

isgaarsiineed si ay u helaan adeegyada kala duwan ee ay bixiso Magaalada Boston. . Wax badan ka baro OLCA boston.gov/lca

###